
Qosolkii Masraxa
Aw-Koombe
Sooraan
Aw-Kuuku
Aw-Gambar
SOMALI NATIONAL THEATER
ee Hobollada Waaberi

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya
Wakaaladda Murtida iyo Maddadaalada

Qosolkii Masraxa ee Hobollada Waaberi

Muqdisho, 1987

TUSMO

Hordhac V
Mahad-naq VI
1. **DOQON NINKII WAX U DHIIBTA ISAGAA KA DARAN**
Waxa curiyey: Cabdullaahi Amiir Aw-Kuuku ... 1
2. Meesha Yaa Maraaya
Waxa curiyay: Xuseen Aw-Faarax 2
3. Guuntii Geela Lagala Noqday 8
4. Doqonkii Geela Raacay 10
5. Doqontii Ariga Raacday
Waxaa curiyey: Xuseen Aw-Faarax 11
6. Safarkii Dhamac 12
Waxaa Curiyey: Cabdullaahi Aadan Cumar "Wayab"
7. Cirro Ceebeed iyo Caasi
Waxaa curiyey: Maxamed Warsame Taban-taabo 16
8. Hinaase Haween Ma dhaqo
Waxaa curiyey: Maxamed Cali Kaariye 21
9. Guriga Aw-Kuuku 23
10. Qof Waliba Waxa Qalbigiisa ku jiro ayuu ku jawaabaa
Waxaa curiyey: Maxamed Cali Kaariye 26
11. Toosinta Tuurta
Waxaa curiyey: Maxamed Warsame Taban-taabo 28
12. Xalwo Ma Qabtaa
Waxaa curiyey: Aweys Maxamed Waasuge . 32
13. Orod Waa Nasiibkaa
Waxaa curiyey: Maxamed Warsame Taban-taabo 36
14. Beentii Beentu Rogatay
Waxaa curiyey: Maxamed Warsame "Taban-taabo" 39

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

HORDHAC

Ummad walba, waa lagama maarmaan in ay raadad taariikhi ah ku reebto socodka nolosheeda, sida dhaqanka, suugaanta, halgammada iyo si-dhex-galka bulshada deegaannadoodu kala fog yihiin ama isku dhow yihiin.

Tan iyo intii aan la qorin Afka Hooyo, arrimaha aan ku soo xusnay ma ay lahayn wax qoraal ah oo la tilmaami karo, taasoo ay sabab u ahayd qoris la'aantii Afka Hooyo.

Haddaba, waxaa nasiib wanaag ah in markii afkeenna la qoray la soo ururiyey qoraallo badan oo ka hadlaya dhinacyo badan oo nolosheenna saameeya, kuwaasoo laga soo saaray buugaag badan oo waxtar weyn u leh sare-u-qaadidda aqoonta bulshadeenna xag dhaqan, dhaqaale, bulsho iyo siyaasadba.

Annaga oo tixgelinayna baahida ay ummaddu u qabto akhriska sheekooyinka, gaar ahaan kuwa madadaalada leh, ayaan waxaan jecelnahay inaan idiin soo bandhigno buuggan oo aan qaddar kooban idiinku soo ururinnay "Qosolkii Masraxa ee Hooballada Waaberi".

Buuggani waxaan ugu talo galnay in uu qayb weyn ka qaato madadaalada bulshada dhexe, si ay u helaan waxay akhristaan oo ay kaga kaaftoomaan buugaagta afafka qalaad ku qoran, isla markaana uu raad fiican ku reebo waayaha nolol-bulshadeedka xagga dhaqanka.

Qoraalka iyo ururinta buuggani waxaa lagu hawlanaa muddo dheer, iyadoo laga soo ururiyey badankiisa abwaaniinta iyo jilaaga Hooballada Waaberi, sida: Maxamed Cali Kaariye, Xuseen Aw-Faarax, Maxamed Warsame (Tabantaabo), Cabdullaahi Amiir Aw-Kuuku, Cali Malleexaan, Aweys Maxamed Waasuge iyo Cabdullaahi Aadan Cumar oo iyana ka qayb qaatay sheekooyinka iyo hab-dhiska qoraallada ee buuggan.

Wakaaladda Murtida iyo Madadaalada, Waaxdeeda Ganacsiga oo hadda buuggan isku soo dubbaridday, waxay hadda iyo wixii ka dambeeya diyaar u tahay inay idiin soo bandhigto fanka oo nooc kasta leh sida: Maqalka (Audio), Maqalka iyo Muuqaalka (Audio-Visual) oo cajaladeysan, sheekooyinka isugu jira jacayl, majaajillo, murti, maad iyo riwaayadaha oo qoraal ah.

Waxaan ka rajeynaynaa akhristayaasha in ay wixii khalad ah ee ay ku arkaan buuggan noogu dul-qaataan, maadaama uu yahay kii ugu horreeyey ee Masraxa ka soo baxa, talana naga soo siiyaan.

MAHAD-NAQ

Waxaan mahad iyo ammaanba u soo jeedinayaa Cabdullaahi Aadan Cumar, oo gacan xoog leh ka geystay soo saaridda buuggan. Waxaa iyaduna ammaan mudan Faadumo Muxyaddiin Xasan oo garaacista buuggan si hagar la'aan ah u gudatay. Mahad taas ka sii daran waxaa leh Amiin Caamir oo sawirrada buuggan sameeyey.

Waxaa kaloo aan ammaan ballaaran u soo jeedinayaa Maxamed Cali Muumin iyo Salaad Axmed Casir oo labaduba ka tirsan Wargeyska Xiddigta Oktoobar oo saxidda iyo isku dubbaridka buuggan sameeyay dedejiyayna inuu si dhaqsi ah u soo baxo.

Waxaa sidoo kale ammaan mudan kooxihii kala duwanaa ee ka tirsanaa Farsamayaqaannada Wakaaladda Madbacadda Qaranka.

Xildhibaan Cabdi Xaashi Cabdullaahi
Maareeyaha Guud ee
Wakaaladda Murtida iyo Madadaalada

DOQON NINKII WAX U DHIIBTA ISAGAA KA DARAN

WAXAA CURIYEY: CABDULLAAHI AMIIR AW-KUUKU

Xaaji Huryo waa nin taajir ah, oo dukaan aad u weyn leh, qalab kastana laga helo. Xaajiga waxaa dukaanka u gada wiil dhallinyaro ah oo magaciisa la yiraahdo Cali Marqaan, oo si aad ah ugu dheereeya qaadka iyo tumashada.

Xaaji Huryo, wuxuu imaanayaa Dukaanka, wuxuuna arkayaa Cali Marqaan oo qayilaya!!!!!

Xaaji Huryo: Waryaa Cali see waaye adiga wiilkay, maalin walba daanka lee kuu buuxo.!!!!Mushaharadda aan ku siiyo iyo waxaan aad ku cunow hayso jaadka-....ee...ee maba is-lehee.!!!!

Cali Marqaan: Xaaji waa iska hadlaysaa, ma ujeeddid miyaa boorka, samboorka, basasha iyo lugo jajabka.!!!

Xaaji Huryo: Jinni jab-jab, qaad iyo qurun ayaa ku jejebiyey, orod ee i dhaaf, dukaankii dhammaa ee camiraa lacag ma leh, qoryo qaad ah lee dhexyaallo, i dhaaf mushaarkii bishan qaado ee i dhaaf.!!!

Iyagoo murmaya waxa u imaanaya Axmed Bas-baas oo dukaan ku leh Xaajiga garabkiisa.

Bas-baas: See waaye Xaaji Huryo, iska daa wiilka dhowr sano buu kuu sheqeyhaayee.

Xaaji Huryo: Balaayo ha u shaqeeyee, lacagteydow qaad ku cunayaa, !!! Maya....maya....waa kaa diiday.

Wiilkii Cali Marqaan ahaa waa la eryey. Xaajigii oo ka fekeraaya qof dukaanka u gada, ayaa uu isha ku dhufanayaa Aw-Kuuku oo walaashiis soo tiri (kac doqon yahaw shaqo raadso, oo carruurta aad abtiga u tahay ha la ciyaarinee, orodoo masaariif u raadi).

Xaaji Huryo: Waxaa durbadiiba niyaddiisa ku soo dhacday in uu Aw-Kuuku qorto, waryaa adiga shaqo ma rabtaa?

Aw-Kuuku: Haa...waa...rabaa...baaba.

Xaaji Huryo: Sigaarka ma cabtaa?

Aw-Kuuku: Maya baaba.

Xaaji Huryo: Qaadka ma cuntaa?

Aw-Kuuku: Maya baaba.

Xaaji Huryo: Gabdhaha seed isku tihiin?

Aw-Kuuku: Baaba...ma...ma...horta magacaa adiga?

Xaaji Huryo: Ee wiilkay...ee...horta magacaa adiga?

Aw-Kuuku: Anigaa?

Xaaji Huryo: Haa adiga waaye.

Aw-Kuuku: Cabdullaahi Amiir deeto Aw-Kuuku.

Xaaji Huryo warbixin guud ee ku saabsan qalabka dukaanka ayuu Aw-Kuuku siiyey, wuxuuna u sheegay sicirka alaabta, qiimaha kala duwan ee tirada guud iyo qalabka.

Xaaji Huryo: Saas waaye wiilkay.!!! waa kaas dukaankii, waxaad gaddana buuggaas ku qor.
Xaajigii waa baxay.

Dukaankii waxaa la wareegay Aw-Kuuku. Isagoo dhex jooga, waxaa u imaanaya gabadh qurux badan, waxayna weydiinaysaa:

Gabadhii: Waa immisa walaal diricaasi?

Aw-Kuuku: Oo wixii la weydiiyaba ku jawaabaya "2500" laba kun iyo shan boqol.

Gabadhii: Waa tahay; waxaan imaan doonaa markaan musha-harka soo qaato.

Aw-Kuuku: Maya...maya...abaayo..!!! iska qaado diracaan ee magacaaga buuggan ku qor iyo xaafadda aad deg-gan tahay.!!!

Gabadhii waxay ku qoraysaa buugga, xaafadda ay deggan tahay iyo magac been ah, weyna baxaysaa waxayna u tegeysaa laba gabdhood oo saaxiibbadeed ah, waxayna ku leedahay: War soo carara mid nacas ah ayaan idin tusayaa oo dukaan haysta oo dharkii aad rabto lacag la'aan ku bixinaya.

Gabdhihii waxay soo qaadanayaan taxi, dukaanka hortiisa ayaa la dhigayaa, dukaankii ayey soo gelayaan:

Gabadhii: Haye abboowe..!!! alla wiilkaan sow u fiican yahay waa ku salaamay.

Aw-Kuuku: Soo dhowaada yaa salaam, dukaanka dukaankiinnii lee waaye.!!!

Gabdhihii: Gareeskan meeqa "Wadajir", ayey u leeyihiin, dira-cana meeqa waaye?

Aw-Kuuku: Kulli min laba boqol iyo konton waaye.!!!

Gabdhihii: Allaa dukaanleyda tuugo waayee, day.!!! wax kasta kun ley gadayaan.!!! Ninkaan dukaankiisana laba boqol iyo konton, lee waaye.!!!

Gabdhihii waxay qaadanayaan wixii dhar ahaa ee dukaanka yaallay.!!!, waxayna weliba ku darayaan alla baabuur aan u baahan nahay, aan dharka ku qaadanno.!!!

Aw-Kuuku: Lacag ma haysatiin miyaa... aad baabuur ku ijaaratjin?

Gabdhihii: Maya...abboowe.!!!

Aw-Kuuku: Hadda hee anigu waa idinku qoraa lee.!!!

Gandhihii lacagtii iyo dharkii oo idil ayey ka qaadeen Aw-Kuuku, waxayna ku qorayaan magacyadooda iyo xaafadaha ay deggan yihiin buugga.

1. Caasho Maxamed oo deggan Xaafadda Shimbiroole;

2. Madiino Cabdi Cali oo deggan Aqab-dheer;
3. Nuurta Sulęymaan oo deggan Dhantaale;
4. Fay Geesey oo deggan Lama-tagaan.

Aw-Kuuku oo keligiis qoslaaya oo farxad ka muuqato, sida uu dukaankii u gaday, isla markaana dukaankii labada sano furnaa laba usbuuc ku dhammeeyey wixii qalab iyo dhar ahaa, dukaankii ayuu xirayaa, wuxuuna fadhiisanayaa dukaanka hortiisa, isagoo fadhiya waxaa u imaanaya Xaaji Huryo, wuxuuna leeyahay :

Xaaji Huryo: Maxaad dukaanka u xirtay ood la shaqaysan weyday?

Aw-Kuuku: Dukaanka alaabtiiyoo dhan waa gaday.!!!

Xaaji Huryo: Waar miyuu waalan yahay, muxuu leeyahay ninku.!!!

Aw-Kuuku: Ma waalniye waa runtay.!!!

Xaaji Huryo: Bal fur aan arkee.!!!!

Aw-Kuuku: "Dukaankii ayuu furay, mise wax yaalla malaha".

Xaaji Huryo: War waa runtaa oo laba saac gudahood ayaad dukaankii oo dhan wixii yaallay ku gadday.!!! War waa nin fiican.!!!

Xaaji Huryo: Haddaan dib u soo camirayaa, oo alaabihii kuwo ka fiican soo dejinayaa, ee bal xisaabtii soo saar?

Aw-Kuuku: Aw-Xaaji xisaabtii buuggay kuugu qoran tahay.!!!

Xaaji Huryo: Bal buugga ha inoo dambeeyee kaashkii soo saar?

Aw-Kuuku: Aw-Xaaji, kaashkii, caddaankii iyo isku jirkoodii buugganay ku qoran yihiin.!!!

Xaaji Huryo: Bal keen buugga.!!!

Aw-Kuuku: Hoo Xaaji waa kan.

Xaaji Huryo buuggii ayuu furayaa, wuxuuna bilaabayaa in uu akhriyo magacyadii, lacagtii, qalabkii, iyo dharkii qalabkii loogu gaday, wuxuuna bilaabayaa:

Caasha M. oo deggan Shimbiraale waxay qaadatay 250 Shilin;
Madiino Cabdi oo deggan Xaafadda Aqab-dheer waxay qaadatay 250 Shilin;
Nuurto Suleymaan oo deggan X. Dhantaale, waxay qaadatay 250 Shilin;

Fay Geesey oo deggan X. Lama-tagaan waxay qaadatay .... 250 Shilin.

Dukaankii wixii yaallay afar qof oo keliya ayaa qaadatay?

Xaajigii oo gariiraya afkiina kala tegey, ayaa wuxuu leeyahay:

Xaaji Huryo: War adeer dadkaan iyo xaafadahaan weligay ma maqlin ee lacagtii awday?

Aw-Kuuku: Lacagtii buuggaasey ku qoran tahay?

Xaajigii oo Aw-Kuuku qoorta ku dheggan ayaa Aw-kuuku walaashii oo ordaysa soo geleysaa:

Dalays: War maxaad wiilka ka rabtaa?

Xaajigii: Dukaankaan qalabkii iyo dharkii meel loo raaco lama yaqaan.

Dalays: Maskiinkan wax ma ogee, asagaaba yaabsane, saad u raadsan lahayd adigaa yaqaanna.!!!

Xaajigii oo yaabsan, wuxuu leeyahay tolow, bal maxaan yeelaa..!!!, wuxuuna bilaabayaa keligiis inuu isla hadlo..!!! dukaankii...kii...kii...kii...kii... **"DOQON NINKII WAX U DHIIBTA, ISAGAA KA DARAN"**.

MEESHA YAA MARAAYA

"Waxaa curiyey: Xuseen Aw-Faarax"

Waxaa jiri jirey laba doqon oo la kala yiraahdo Miida iyo Meecaad.

Miida waxay ahayd gabadh doqon ah, waxayna seexan jirtay Buul Caws af-bannaan, Meecaadna wuxuu seexan jiray Buul caws-keeda hortiisa.

Meecaad aroor kasta marka uu tooso, wuxuu arki jirey Miida oo maradii ka dhacday bowdaheeda cadcadina qaawan yihiin, subax subxaha ka mid ah ayaa Meecaad damac ka galay bowdaha Miida, wuxuuna is-yiri: "Caawa waa inaan ku gudaa.!!!

Habeennimadii isagoo waxoogaa cabsi ah ku jirto, Miidana soo jeeddo ayuu ku dul-war-wareegay:

Miida: Meesha ayaa marmaraaya?

Meecaad: Anaa marmaraaya.!!!

Miida: Marmaroo meeshaada ha soo dhaafin.!!!

Habeenkii dambe ayuu Meecaad soo kacay markaasuu Miida cagaheeda sal-salaaxay.!!!

Miida: Yaa cagahayga marmaraaya?

Meecaad: Anigaa marmaraaya.!!!

Miida: Marmaroo meeshaada ha soo dhaafin.

Habeenkii saddexaad ayuu Meecaad ku soo guday Miida, markaasuu kubabkeeda sal-salaaxay.!!!

Miida: Yaa kubabkayga marmaraaya?

Meecaad: Anigaa marmaraaya.!!!

Miida: Marmaroo meeshaada ha soo dhaafin.

Habeenkii afraad ayuu Meecaad gacantiisii ku salaaxay bowdyaheeda.!!!

Miida: Yaa salsalaaxay bowdayadeyda?

Meecaad: Anigaa salsalaaxay.!!!

Miida: Salsalaaxoo meeshaada ha soo dhaafin.

Habeenkii ugu dambeeyey ayuu Meecaad geesi iska dhigay, markaasuu gacantiisii ilaa sarcanteeda ku salsalaaxay.!!!...!!!

Miida: Yaa sidaa ii salsalaaxay?

Meecaad: Anaa sidaa kuu salsalaaxay.!!!

Miida: Ii salsalaaxoo meeshaa ha soo dhaafin.

Iyagoo wada faraxsan eyey qosol-qosol ila qosol isku wada dareen.!!!

GUUNTII GEELA LAGALA NOQDAY

Waxaa jiri jirey nin aad u fiican oo magac weyn lahaa, wuxuuna dhalay gabadh keliya oo guun noqotay (gabadh aan weligeed la guursan).

Wiil dhallinyaro ah ayaa wuxuu maqlay ninkaa wanaagsan ee magaca dheer leh, dadkuna sida aadka ah u maamuuso, wuxuu ku tashaday in uu gabadhiisa guursado, inkastoo aanu arag muuqaal-keeda, hase yeeshee, wuxuu maqlay in uu gabadh leeyahay.

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu wiilkii soo kaxeeyey geel tiradiisu gaarayso shan iyo labaatan halaad. Geelii wuxuu soo dul joojiyey reerkii ninka magaca weyn lahaa.

Nin ka mida reerka:- Haye, adeer nabad ma la sheegay?

Wiilkii:- Wax balaayo ah ma sheegin.

Nin ka mida reerka:- Geelaan yaad u waddaa? yaadse u socotay?

Wiilkii:- Waxaan u socday ninka magaca weyn ee hebel la yiraahdo, waxaanan doonayaa inaan gabadhiisa guursado, geelana iyadaan ka yarad keenay.

Wiilkii si aad ah ayaa loo soo dhoweeyey, geeliina waa laga guddoomay gabadhii uu codsadayna waa la siiyey.

Gabadhii guunta ahayd waxaa loo sheegay in nin la siiyey, waxaasoo geelana iyada laga yarad keenay. Guuntii waxay ku jawaab-celisay "Allaylehe inteebaan ku sugay"!!!.

Wankii sooryada ayaa la qalay, waxaana hilbihiisii loogu soo dhiibay gabadhii, iyadoo ay u tahay aragtidiisii ugu horreysay ee uu gabadha arko.

Gabadhii markuu indhaha saaray si aad ah ayuu u carooday, isagoo qalbiga iska lahaa (Maxaa loogu soo dhiibi waayey sooryada gabadhii lagu siiyey). Gabadhii guunta ahayd sooryadii loo soo dhiibay ayey hor dhigtay wiilkii.

Wiilkii: Gabaray celi hilbahaan oo ha loo soo dhiibo gabadhii la i siiyey.!!!

Guuntii: Gabadha lagu siiyey waa aniga.

Wiilkii: Intuu xeeradii soo qaaday oo u dhiibay ayuu ku yiri: Naa ma tihide celi oo ha loo soo dhiibo gabadhii aan doonaayey.

Gabadhii guunta ahayd hilbihii intay celisay, ayey u sheegtay reerkii in uu wiilkii ku diiday, kuna soo yiri "hilbaha ha loo soo dhiibo gabadhii aan doonaayey".

Raggii ayaa hilbihii soo qaaday oo isagii ku soo celiyey;

Nin raggii ka mida: Adeer ninku gabadh kale ma lehee, iska imaanso.!!!

Wiilkii: (Intuu cabbaar aamusay), waa yahay ee iska dhiga hilbaha.!!!

Wiilkii hilbihii waxna waa cunay, intii kalena sahay ayuu ka dhigtay, wuxuuna dareersaday geeliisii goor ay saq dhexe tahay.

Aroortii ayaa la ogaaday in wiilkii xalay dareersaday geeliisii, waxaana loo sheegay gabadhii guunta ahayd lagala noqday geelii laga yarad bixiyey.

Doqon hadal kama daahnee, waxay tiri: "Facayga iyo fildarra-deyda markaan eego, waan filayey in laygala noqdo.!!!

DOQONKII GEELA RAACAY

Waxaa isna jirey wiil doqon ah oo geel jire ahaa, laguna magacaabi jirey Meecaad. Meecaad maalin maalmaha ka mid ah ayuu geelii foofshay, isagoo geelii la jooga ayuu arkay sagaaro meel daaqeysa, wuxuuna niyadda gashaday in uu sagaaradaa hilibkeeda dubto maanta, Meecaad, wuxuu ku yiri sagaaradii "sagaarow dab iyo mindi baan kuu doonayaa ee halkaasi sii joog oo ha ka dhaqaaqin", geeliina wuxuu ku yiri: "Geelow adna halkaa sii daaq oo ha ka dhaqaaqin inta aan ka soo noqonaayo".

Wiilkii Meecaad oo doqonka ahaa reerkii buu dib ugu soo noqday.

Hooyadiis: Hooyo....Meecaad maxaad soo doontay?

Meecaad: Ihi...ihi....dab iyo mindi i sii hooyo.!!!

Hooyadiis: Hooyo waa kuwane hoo,... oo degdeg ugu tag geelii, yaanu lumine.

Meecaad isagoo dabkii iyo mindidii la ordaya ayuu yimid meeshii, hase yeeshee, geelii iyo sagaaradii midna waa waayey.

Maalintii oo dhan baadi-goob ayuu ku jirey, galabnimadii markuu daalay ayuu ku soo noqday reerkii isagoo marna sidii geelii u ololaya, marna sidii sagaaradii wis...wista haya, reerkii oo dhammi waa yaabay.

Hooyadiis: Hooyo....maxaa ku helay?

Meecaad: Waxba ima heline ee geelii iyo sagaaradii labadiiba anigaa ah.!!!

DOQONTII ARIGA RAACDAY

"Curiyey: Xuaseen Aw-Faarax"

Waxaa iyana jirtay gabadh doqon ah oo la oran jirey Miida, maalin maalmaha ka mid ah ayey raacday ariga oo ay foof-geysay.

Markay duhurkii gaartay, cadceeddiina ay kululaatay ayuu arigii geed hoos weyn hergalay, Miidana way iska dhex seexatay, casarkii markii ay cadceeddii gaabatay ayuu arigii geedkii ka dareeray iyadoo hurudda.

Miida waxay toostay goor cadceeddu aad u gaaban tahay, waxayna eegtay hareeraheeda, iyadoo eeg-eegaysa arigii, hase yeeshee, il may saarin, waxayse aragtay dameer geedkii jooga. Miida iyadoo naxsan ayey ku fakartay arigii dameerkaan ayuu noqday, waxayna soo kaxaysatay dameerkii oo ay keentay reerkii, waxaana ku soo baxay dad badan oo aabbaheed ka mid yahay.

Aabbaheed: Miida arigii mee?

Miida: (Iyadoo qosleysa qosol nacasnimo), aabbe...ihi...ihi..arigii oo dhami wuxuu noqday dameerkaan.!!!

Aabbaheed: Doqon Ilaahayna waa hafartaaye...!!!! markii Ilaahay arigii oo dhan ka dhigay dameerkan, adna muxuu dameer kaaga dhigi waayey?

Miida: Wuu iga dhigi lahaaye... Anigu waan hurday, ariguna waa soo jeeday!!!

SAFARKII DHAMAC

Waxaa Curiyey: Cabdullaahi Aadan Cumar "Wayab"

Dhamac wuxuu ahaa nin dhallinyaro ah oo degganaa tuulo la yiraahdo Go'o, wuxuuna ka mid ahaa qab-qablayaasha tuulada ee aan dabadood la hadal. Wuxuu ijaari jirey baabuurta caanaha ka gurta tuulada ee geysa magaalada Burco, oo tuuladaasi u dhoweyd.

Dhamac wuxuu muddo badan ku taamayey in uu tago magaalo-madaxda Muqdisho, hase yeeshee, wuxuusan aqoon meeshii uu ugu hagaagi lahaa ina-adeerkii oo ka shaqeeya magaal-ada Muqdisho.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxay ku kulmeen tuuladii nin la yiraahdo Jaamac Qan-yare, wuxuuna weydiiyey Dhamac goorta uu ka yimid Muqdisho.

Dhamac: War Jaamac, goormaad ka timid Muqdisho?

Jaamac-qanyare: Laba cishaan ka sokeeyey.

Dhamac: War kii aannu ilma-adeerka ahayn ayaan doonayaa in aan u tagee, ma ka war heshay, mase og tahay meesha uu ka deggan yahay Muqdisho?

Jaamac-qanyare: Haa, waan arkay gurigiisa, wuxuu ku yaallaa Xaaji Bullaale dabadiisa oo haddaad tagto Hoteelka Xiirane waa laguu sheegi doonaa.

Dhamac: Bal ii kaadi Jaamac, baska marka aan ka dego, maxaan yeelaa?

Jaamac-qanyare: War heedhe, maxaad badow isaga dhigaysaa, sawdigii intaa magaalo joogay maaha.!!! baska markaad ka degto, taksi baad raaci oo aad leedahay i gee Hoteelka Xiirane, dabadeedna halkaa indho-garasho ka waayi meysid.!!!

Dhamac iyo Jaamac waa ay kala tageen, wuxuuna dhamac intaanu gurigoodii gaarin go'aansaday in uu berri raaco gaariga Xamar u jeeda ee ugu soo horreeya.

Subax hore ayuu Dhamac ka soo raacay tuuladii baabuur (Isusu) ah oo u soo jeeda Xamar, waxayna Xamar soo galeen maal-intii dambe duhurnimadeedii.!!! Goobtu waa Ceel-gaab. Dhamac oo baabuurtii badnayd ee is-dhaaf-dhaafaysay iyo hoonkoodii wareersheen oo had walba dhinaca eegaya, ayaa laamiga dhinaci-isa soo joogsaday, wuxuuna joojiyey taksi.

Taksiile: Haye walaalkiis intee rabtaa?

Dhamac: Waar balaayo badanaa.!!! War waxaan doonayaa inaad i geyso Baar Xiirane oo aanan garanayn meel uu ku yaallo.!!!

Taksiile: Waa lagu geyhaa, sahal lee waaye, beeso ma qabtidoo?

Dhamac: Kuma fahmine, biliis ii bal-ballaadhi?

Taksiile: Waa ku fahmay ee lama boqol shilin lee bixi.

Dhamac: Waar waxaad doontaan ku siinayaa ee i gee.

Taksiilihii isagoo ogsoon inuusan garanayn Hoteelka Xiirane, ayuu intuu cabbaar war-wareejiyo hordhigay Ajibka Siinaay, mar-kaasuu u tilmaamay Hoteel ka soo horjeeda Ajibka.

Dhamac intuu lacagtii siiyey ayuu degey, wuxuuna tegey Hoteelkii isagoo u haysta Hoteelkii Xiirane. Wuxuu fariistay miis, intuu ushiisii baakooradda ahayd dul-saartay kursigii, boorsadiina hoos gashaday, ayuu u yeedhay adeegihii makhaayadda.

Adeege: Haye siyo, maxaan ku siihaa?

Dhamac: Dee maxaa la cunayaa oo yaalla?

Adeege: Il-brimo: Waa Isbageeti al-forno, isbageeti saldato, riiso biyaanko, iyo riiso con suugo. Secondo: Kabreeto al-foorno, Kabreeto al-zigni, kabreeto al-latte, beeshi fritato, muuskolo, arroosto, bisteeki alla bismark, boollo al-diavolo, iyo tribbo. Teerso waa : Frutto, Babaay Kareema iwm. Cabitaanka waa: Jinjir, marinda, isbremuuto iyo acqua minerale.

Dhamac: War bal sug,!!! waxaan aad tirinaysaa ma cuntaa, mise waa qalab dhismo.

Adeege: Yaakhay see camal waaye, adiga kulli cunto waaye.!!!

Dhamac: Kulli ma arki karaa?

Adeege: Waxaada ciyaar waaye.!!! sejeraato, wax ma dalbahaysaa, mise waa kaa tagaa.

Dhamac: (Oo dhafoorrada gacanta ku haysta)... bal adeer tii ugu dambeysay ii sheeg?

Adeege: Ma brimo mise sekontada?

Dhamac: Kuwii hore tii ugu dambeysay.!!!

Adeege: Tribbo miyaa?

Dhamac: War iyadaba noo keen.

Adeegihii oo la ordaya saxan tribbo ah iyo maraq iyo muufo, ayaa soo saaray miiska Dhamac.!!!, Dhamac intuu fiiriyey cuntadii uu adeeguhu u keenay ayuu arkay inay calool tahay...!!!...wuxuuna u qaatay in isaga lagu xumaynayo.

Wuxuu si qummaati ah u soo qaatay bakooraddiisii, wuxuuna u yeedhay adeegihii, markaasuu intuu la dhacay ushii ku yiri: "War bal muslin yahow islaameed daya, nacaskaas wuxuu ii keenay!!!

Dhamac iyo adeegaha, waxaa isla markiiba kala dhex-galay oo kala qabtay nin dhinaca ka fadhiyey oo labadoodaba aad u fahmay, Dhamac, ayuuna kursigii dib ugu fadhiisiyey. Intuu kala maslaxay ayuu adeegihii ka codsaday in uu raalli ahaado, oo iska wato hawshiisa.

Ninkii odayga ahaa ayaa ku yiri Dhamac "Caloosha waa cunto la cunee aniga ii sheeg cuntada aad doonayso". Dhamac, waxaan doonayaa waslad hilib ah iyo bariis,!!! Ninkii odayga ahaa wuxuu u yeedhay adeegihii, wuxuuna u dalbay cuntadii. Adeegihii cuntadii ayuu keenay, markuu miiska saaray intuusan dhaqaaqin waxaa is-warsaday Dhamac iyo ninkii odeyga ahaa.

Ninkii odayga: Adeer bal ii warran oo yaad magaalada u timid?

Dhamac: Adeer waxaan raadinaayey midaannu ilma-adeer nahay oo la yiri, wuxuu galaa Xaaji Bullaale dabadiisa.!!!

Adeegihii ayaa wuxuu maqlayaa Xaaji Bullaale dabadiisuu galaa.!!! markaasuu adeegihii yiri (haddaayay waxaas yiri, cunto aan af-garanno inoo keen, haddana waxaas keenay Xaaji Bullaale dabadiisaas galaa)..... Wallaahi kan ma fiyooba!!! aniga bes waa iga tufan yahay.

Nasiib-wanaag ninkii odayga ahaa wuxuu gartay gurigii uu raadinayey, kaddibna cuntadii markuu dhammaystay ayuu kaxeeyey, wuxuuna u geeyey ninkii uu rabay.

CIRRO CEEBEED IYO CAASI

Waxaa curiyey: Maxamed Warsame Tabantaabo

Guureeye, waa nin maalqaabeen ah, wuxuuna qabaa duq Xaddiyo la yiraahdo oo u dhashay sagaal carruur ah. Hase yeeshee, wuxuu ku ibtilaysan yahay gabdhaha yaryar, wuxuu habeen kasta ku ag-war-wereegaystaa meelaha ay ku badan yihiin duulka yaryar, sida: Jumbo Jelaato iyo Xarumaha Caweysyada hortooda iwm.

Guureeye isagoo galab galbaha ka mid ah u xarko xirtay meelihii lagu yiqiin ayey Xaddiyo ku tiri: "Guureeyow waayahan goor dambaad soo hoyataaye, aroortii baana ku arkaaye, ma mid kalaad la hoyataa"?

Guureeye: Horta ma taqaan inta da'ood ee aan kaa dhalay?

Xaddiyo: Haa oo sagaal carruura ayuu Ilaahay ina kala siiyey.!!!

Guureeye: Sagaalkaba qaylo iyo qaxar baan kaaga dhalay, ee ma saddexdaadaan hore ku siiyaa, mise qumaati iyo qaylo la'aan ayaad reerkaaga u joogi oo u dhaqan.

Xaddiyo: Guureeye,.... raalli ahaw oo ha kululaan, su'aal bay iga ahayde... meeshaad rabtana aad... afkeygaa waxaasoo dhanba ii keenay.

Guureeye waa soo baxay isagoo turihii baabuurka gacanta ku sida, wuxuuna dalaq dhex yiri baabuurkiisii arjentada ahaa, wuxuuna afka u saaray goobihiisii, wuxuuna isla markiiba isagoo hareeraha laamiga fiirfiirinaya, isha ku dhuftay gabar jidka taagan oo magaceeda la yiraahdo "Fasaxan", ballanna la lahayd saaxiibkeed "Jeeg", wuxuuna markuu isha ka buuxsaday go'aansaday inuusan tan caawa sinnaba ku dhaafin, ee uu maraqeeda cabbo.

Fasaxan oo weli halkii taagan ayaa waxaa u yimid saaxiibkeed "Jeeg":

Fasaxan: Xabiibii sow caawa ma ogid in Kooxihii oo la isku daray ay ka tumayaan Caweyska Al-Curuuba, waxaan filayaa inaad inoo waddo xisaabtii aan kaga qayb geli lahayn caawa.

Jeeg: Maya... Xisaabtaa caawa ma haayo.

Fasaxan: Haddaa ma Hindigaad inoo haysaa, isaguba caawa waa fiican yahaye?

Jeeg: Maya...Wallaahi abbaayo caawa xitaa xaqal-Hindi ma hayo.

Fasaxan: Haddaa malaha xaqal-jeelaato ayaad noo haysaa?

Jeeg:- Maya....Anigu caawa eber baan joogaa ee adigu miyaanad qalqaalo soo helin?

Guureeye oo ku dul meereysanaayay ayaa soo ag joogsaday isagoo baabuurkiisii wata, intuu baabuurkii ka soo degay oo kala dhex galay ayuu ku yiri "Adeer miyaad taqaan gabar la yiraahdo Sahra oo meelehaan ku jirta", Guureeya wuxuu gacantiisa hadba meel ka sii marinayaa Fasaxan marka uu tilmaamayo meelaha uu u maleynaayo inay deggan tahay Sahra, iyana iyadoo jeebabkiisa kor ka taabanayso ayay tiri, maya Adeer, iyadoo hubisay inuu Lacag badan ku wado jeebka Shaatiga Saryaanka ah.

Ficilkii Guureeye iyo Fasaxan waxaa ka xanaaqay Jeeg, Fasaxan markay dhiniciisa eegtay ayay fahamtay inuu xanaaqay waxayna ku tiri Guureeye "wax yar i sug yarkan walaalkay ah ayaan alaab la inoo diray u dirayaaye!!!

Fasaxan:- Jeeg, xabiibi maxaad isla xanaajinaysaa . . . . jeceelkeenii qalaylka ahaa ayaan qoyaan u raadinayaaye, bal adigu gidaarkaa igu yara sug wax yar.

Guureeye:- Isagoo fiirinaaya sida wacan ee ay u soo laafyooneyso wuxuu niyaddiisa ka leeyahay, wallee tani caawa gacantayda ku jirtaa....waaba... dheylo....wallee....tan caawa waaban jajabsan.

Fasaxan iyadoo dhoolla caddeynaysa ayay Guureeye dhinaca ka soo fariisatay.

Guureeye:- Horta halmaan hadal kuma jiree, aniga Guureeyaa lay yiraahdaa ee adiga magacaa?

Fasaxan:- Magacaygu waa Fasaxan.

Guureeye:- Marraa waaxid....magacaagu aad buu u wanaagsan yahay ee ma ardayad baad tahay?

Fasaxan:- Maya....iskool mar horaan iska dhaafay....muxuu macna leeyahay iskool!!!

Guureeye:- Haddaan caawa aniga iyo adiga iihii....waad fahmeysaa.

Fasaxan:- Waayahaye ilko ma leedahay?

Guureeye:- Yaxaas waa ka ilko badanahay.

Fasaxan:- Haddaad ilko badan tahay hal ma yeeli kartaa?

Guureeye:- Halkaasi waa maxay?

Fasaxan:- Ma yeeli kartaa inaan galabta is mehersanno caawana aqal galno?

Guureeye:- Taasi waa basiid ee tobankan kun Shilin sii qaado oo isa soo diyaari gurigana waa ka shanta dabaq ee buurka dusheeda, anna Sheekhii baan soo diyaarinayaa, lixda galabtana goobtan aan isugu nimaado oo ha daahin yaa . . . . hadda . . . . yaa.

Guureeye isagoo si aad ah u faraxsan ayuu mooteystay baabuurkiisii.

Fasaxan waxay u tagtay Jeeg oo ku sugaaya darbigii waxayna ku tiri "waa adigii is xanaajinayee bal fiiri waxan xisaab ka sido odaygii.!!!

Jeeg:- Wax ma ku su'aali karaa?

Fasaxan:- Haa . . . . haa.

Jeeg:- Odaygu sababta uu waxan oo lacag ah kuu siiyay maxay tahay, illayn wax yar baabad wada joogteene?

Fasaxan:- Waxaannu ku heshiinnay inaan cawada is aroosno.!!!

Jeeg:- Haddaa aniga maxaad ii daalinaysaa ee aad saaxiib . . . . Saaxiib iigu dabahaysaa?

Fasaxan:- Alla yaa doqon la saaxiibi jiray, war lacagta ayaan ka gurbinayaaye, guriga, lacagta iyo anigaba Adiga ayaa u sarreeya, jeceylkayga runta ahna waa adiga, ee maseyrow yahow iska dhaaf maseyrka.

Jeeg:- Waa yahay ee marka uu joogo iyo marka uu maqan yahay guriga sideebaan ku ogaan karaa, oon isu arkaynaa?

Fasaxan:- Waxaan sameysaneynaa baaq aan isku af garanno baaqaas oo ah foori aad laba jeer . . . . fii . . . . fii ka siiso haddii uu joogo waan aamuusayaa, haddii uu maqan yahayna hal mar baan kuu foorinayaa . . . . fii . . . . hadda sidaas ha hilmaamin....yaa.

Arrintaasi markay ku heshiiyaan ayay Fasaxan saaxiibkeed Jeeg ku tiri "Xabiibi lacagta intaad rabto ka qaado, caawana caweyska iska aad oo adigu nooga qayb gal, guriga aroosku ka dhacayana ka hallaabi meysid oo waa kan shanta dabaq ee buurta dusheeda ku yaal, waana inoo berri siddeeda subaxnimo, marka uu Guureeye shaqada aado.

Fasaxan waxay aadday gurigoodii iyadoo soo xiratay dharkeedii kama dambeysta ahaa, barafuun kala nooc-nooc ahna isku soo bilbishay, waxayna garabka soo suratay Boorso dheer, waxay ka soo ambabaxday gurigoodii waxayna isa soo taagtay goobtii lagu ballamay. Hal daqiiqo iyadoon taagneyn, ayuu gaarigii arjantada ahaa soo ag dhigay isagoo xagga dambena u saaran yihiin Skeekhii iyo shuhuuddii. Fasaxan dalaq ayay soo tiri kaddib markuu ka furay albaabka baabuurka ee kursiga hore.

Fasaxan waxaa lagu dhex meheriyay gurigii kaddib markay Sheekha u caddeysay arrimaheedii, inay mehersan kartana Shiikha ay xaqiiqo u noqotay.

Habeenkaa halkaasuu arooskoodii uga bilaabmay. Subixii goor ay tahay siddeedii subaxnimo ayuu Jeeg isa soo taagay dariishaddii guriga, wuxuuna ku dhuftay fooridii la isla ogaa fii . . . . fii . . . .

Guureeye:- Fasaxan, muxuu yahay waxaan ilaa saaka fiiq fiiqda hayaa.... dhii.... dhaadu waa maxay?

Fasaxan:- Bal aan fiiriyo, waxaan u maleynayaa inay yihiin carruurtii xaafadaha agteynee.

Fasaxan intay daaqadda qoorta ka soo taagtay ayay tiri "Jeeg, foorida naga kala yaree, weli waa joogaa....mar dhaw buu baxayaa.

Guureeye isagoo shakiyay ayuu ku yiri Fasaxan, hoo buuggani waa kii xisaabaadkee istoodhka ii geli. Fasaxan waxay intay ka qabatay buuggii ula dhaqaaqday xaggii istoodhka, iyadoo ay weli fooridii Jeegna socoto.

Guureeye:- Intuu hal foori ah ku jawaabay ayuu qalbigiisa ka yiri "wallee wixii jira waan ogaan", sariirta ayuuna hoos galay.

Jeeg oo jawaabtii foorida ee ballanta ahayd helay ayaa dalaq soo dhex yiri gurigii, welina isagoo foor-fooriyaya, labada kelyoodna gacanta ku haysta, hareerahana Fasaxan ka eeg eegaya.

Fasaxan markay bakhaarkii ka soo laabatay ayay gurigii ugu dhex timid Jeeg. Naxdin ayay qac la tiri, waxayna hoos ugu dhawaaqeysay (alla waa uu joogaa .... alla waa uu joogaa) iyadoo Jeeg hadba hareer uga wareegeysa.

Fasaxan markay il saari weyday Guureeye, ayay tiri "wallee waa i raagsaday oo waa iska baxay" haa .... haa .... alla aad baan u naxay xabiibi oo waxaan mooday inaad soo gashay guriga isagoo jooga .... ina fariisi xabiibi sariirta aan iska raaxraaxeysannee.

Isla markii sariirta la kor fariistay ayaa la bilaabay dhundhunkasho, sal-salaaxid iyo reen kalgaceyl .... xabiibi xalay ma seexan iyo anaa kaa darraa.

Guureeye intuu u adkeysan waayay waxa dushiisa ka yeeraya ayuu la kacay sariirtii isagoo leh "Kaalay.... kaalay!!!" labadiinnuba halkan horteyda ah soo joogsada isagoo lulaya bakooradiisii illayn magacaagu waa iga hoos baxaye Fasaxan waxa laguugu bixiyay raggoo dhan baad u fasaxan tahay.

Guureeye:- Naa midkani sow kaad walaalka iigu sheegtay maaha?

Fasaxan:- Haa .... haa ... waa isagii .. .!!!

Guureeye:- Iimaanka lagaa qaad .... walaalku dhunkasho weynaa .... oo walaalkaa salaax weynaa .... oo walaalkaa reyn weynaa .... oo walaalkaa xabiibi badanaa . .!!! iga baxa iimaanka fiq lagaa siiye, saddexdaadiina iga qabso oo hore ii dhaaf oo ha igu soo noqon.

Guureeye isagoo calaa-calaaya ayuu wuxuu leeyahay, weligay tan oo kale ima soo marin, anaa isu geystay oo noqday cirro ceebeed iyo caasi Xaddiyana nabsigii aan ka galay ayaa i qabtay, haatanna waa in aan maslaxaa, anigana wareeg dambe iyo caasi toona la iguma halleeyo meeshooda iyo meel ka dheer.

HINAASE HAWEEN MA DHAQO

(Waxaa curiyay: Maxamed Cali Kaariye)

Waxaa jiray nin la yiraahdo Hinaase, naagtiisa jecel, iyaduna ka heli jirtay inay kolba wax sii kororsato, tan iyo markay dan yarta ahaayeen, beri dambuu Hinaase xoolo yeeshay waxay tiri Haweeya dumarkii asaaggay ahaa baabuur bay wada wataan waa inaad anigana i bartaa baabuurka wadistiisa, ka dibna baabuur ii iibiso nooca cusub, waana u fulay codsigeedii Haweeya. Habeenkii dambe ayay baabuurkii cusbaa kaxaysatay, iyadoo gaadhay hooyadeed.

Hinaase markay toban daqiiqadood ka sii maqnayd ayaa welwel ku dhacay, isagoo isla hadlaaya ayaa waxaa u yimid saaxiibkii Habaabiye, oo ku yiri maxaa ku helay?

Haweeya iyo baabuurkii midna ma hayno.

Habaabiye:- Mar dhaweyd baan ku arkay jidka iyadoo sii socota.

Hinaase:- Yaa la socday?

Habaabiye:- Laba nin iyo naag.

Hinaase:- iyada yaa ag fadhiyay?

Habaabiye:- Nin qurux badan oo xoog badan ayaa la fadhiyay oo weliba kursiga dhankeeda ugu tiirsanaa.

Hinaase:- Waa xanaaqay oo carooday.!!! Wuxuuna ku yiri saaxiibkii been baad ii sheegeysaa.

Habaabiye:- Waa iska dhaqaaqay.

Hinaase:- Intuu soo qabtay saaxiibkii caradiina iska baabi'iyay ku yiri, "maxaan yeelaa ila tali?"

Habaabiye:- Wuxuu ku taliyay.!!! Inuu tilifoon u diro Ciidamada Nabadgelyada Waddooyinka loona xiro baabuurkii iyo ciddii wadata, isagoo ku andacoonaya in la xaday baabuurka oo uu isagu leeyehay.

Waxaa la qabtay Haweeya iyo baabuurkii, lagana xareeyay baabuurkii, iyadiina la xiray.!!! Waxaa loogu soo warceliyay Hinaase, in baabuurkii iyo gabadhii wadatay oo la yiraahdo, Haweeya ay ku xiran yihiin Taraafiko. Hinaase iyo saaxiibkii waxay yimaadeen xafiiskii Taraafikada, isagoo u dacwoonaya in loo soo daayo baabuurka iyo xaaskaba.

Heegan nin la yiraahdo oo shaqada lahaa ayuu ku yiri: Baabuurka anaa iska leh, naagtana anaa qaba, ee ii soo daa.!!! Heegan wuxuu yiri: Taliyihiibaa maqane ha yimaado, Hinaase waa xanaaqay, wuxuuna la tashanayaa saaxiibkii Habaabiye, wuxuuna yiri: maxaan yeelaa?

Habaabiye wuxuu yiri: askeriga dhirbaax!!! Waxaa lagugu xirayaa meesha naagtaadu ku xiran tahay, haddii kale Haweeya caawa Allaha u naxariisto. Hinaase isagoo taladii saaxiibkii qaatay ayuu askerigii labadii indhood ku dhiftey !!! weliba teer iyo laad ugu daray!!!

Hinaase waxaa lagu xiray qol ay ku xiran yihiin niman tuugo ah. Hinaase albaabkii buu soo jabsaday markii la su'aalay wuxuu rabana wuxuu yiri "Naagteyda ila xira sababtoo ah waxaan waxaasoo dembi ah u galay in isku meel nalagu xiro". Hinaase iyo Heegan oo is haysta waxaa u yimid Hubiye oo ah Taliyihii Saldhigga. Markuu dhegeystay dacwada iyo kiiska loo haysto Hinaase, wuxuu saaxiibkii Heegan ka codsaday inuu ka saamaxo dilkuu u geystay, waxaa kaloo uu amray in loo soo daayo baabuurka iyo xaaska. Haweeya markii ay soo baxday iyadoo ciil iyo caro la sakaraad ah weliba tirsaneysa in la ceebeeyay waxay ku tiri Hinaase oo ninkeedii ah "Baabuurkaagana kaxayso, Adigana nabadgelyo". Hinaase wuxuu la tashaday saaxiibkii Habaabiye: Maxaan sameeyaa?

Wuxuu yiri "Furaha baabuurka iyada sii, gurigaagana iyada ku qor". Hinaase wuxuu yiri "Tan dambe uun iga reeb, inta kale waan reebayaa". Halkaa waxaa ku heshiiyay Hinaase iyo Haweeya markuu u sheegay inuu u sameeyay waxaas oo idil jeceyl uu iyada jecel yahay daraadeed.

GURIGA AW-KUUKU

Waa saq dhexe, waxaa sariirta jiifa Aw-Kuku oo nolol cajaa'ib ah ku dhex jira, kuna riyoonaya isagoo korkiisa gabdho aad u qurux badan ku hawlan yihiin, isla markaana mid-mid ula tumanaaya.

Aroortii ayuu ka soo booday sariirtii isagoo faraxsan, wuxuuna ka dhex baarayaa guriga gabdhihii isagoo meel walba gacanta gelinaaya, wuxuu u imaanayaa nin saaxiibkii ahaa oo la yiraahdo Sama-taliye, kuna caan baxay xagga qiyaamada iyo riyo been ka sheegidda, salaan ka dib:

Aw-Ku-ku:- Aw Sama-taliyoow, xalay waxaan arkay wax la yaab leh,!!!

Sama-taliye:- Maxaad aragtay ee yaab leh?

Kuku:- Saqdii dhexe ee xalay waxaan arkay gabdho badan oo kala nooc-nooc ah oo korkayga dushiisa ku hawlan. !!! oo aad u qurux badan.

Sama-taliye:- Oo maxay ka sameynayeen korkaaga?

Kuku:- Tu waa i salsalaaxaysaa, tu waa i shumineysaa, tu rikoodhkay ii daareysaa, tu caanay ii waddday, tu lugahay ii riixriixaysay, tu waa i babineysay. !!!

Sama-taliye:- Oo haddii intaa laguu sameeyey maxaad rabtaa?

Kuku:- Sidaan xalay u arkay inaan maanta u arkaan rabaa?

Sama-taliye:- Riyadii aad xalay aragtaad maantana rabtaa miyaa inaad mar labaad aragto?

Kuku:- Haa . . . Haa . . .

Sama-taliye:- "Oo qosol la dhacay", waa yahay ee i sug, waana u fekerayaa . . . . sidaad u arki lahayd, waxaad tegeysaa Suuqa, meesha qudaarta lagu gado, halkaasi istaag gabadhii aad xalay aragtay ma gefeysid?

Aw-kuku:- Maya baaba . . . . !!!

Sama-taliye:- Orod ee suuqa tag mid - midna ula sheekeyso . . !!!

Aw Kuku wuxuu tegayaa suuqa qudaarta ee Xamar-weyne, halkaasoo uu ku sugaayo gabdhihii uu xalay ku riyooday, !!! . . . . wuxuuna u yeerayaa gabadh suuqa adeeg u soo doonatay . . !!!

Aw Kuku:- Hooy . . . yareey kaalay !!! . . . kaalay.

Gabadhii:- Waryaa ayaad yareey ku leedahay?

Aw-Kuku:- Adiga . . . bella ee xalay saqdii dhexe aniga ma iila jooginoo, kursiga kan ma ahee kan kale ma ku fadhininoo . . . rikoodhka ma noo daarinoo, . . . xabiibi . . . . xayaatii . . . xalay oo dhanna ma . . . .

Gabdhii 1aad:- (Dhirbaaxo ayey ku dhufaneysaa Aw kuku), wasaqyahow ciyaala suuqa ah, halkeed xalay igu aragtay . . !!!

Aw Kuku:- Iska raalli ahaw riyadii xalay adi maba ku jirin !!!

Aw Ku-Ku oo foor-foorinayaa oo kaligii isla hadlayaa ayaa waxaa soo maraysa gabadh kale oo aad u qurux badan . . .

Aw ku-ku:- Ooh . . . waa tii xalay ugu qurux badnayd ee i shumineysay kaalay xabiibii . . . Alla xalay . . . sidaan kuu xasuusto, yaa xayaatii . . . yaa xabiibii . . . . xalay ma ilowday?
"Isagoo gabartii isku tuuraya"

Gabadhii 2aad (Dhirbaaxo iyo feer ayey isugu dartay), walaashaa ayaa xabiibi ah daayeeryahaw . . . tacbaanka ah, . . . waxaas ayaa jidka nagu qabsanaya . . . bal fiiri siduu u yaal. !!!

Aw Ku-Ku:- Wallaahi kuwii xalay maba ahee . . . juginaa waa igu dhacday bal arrintan ula noqdo Sama-taliye.

Wuxuu u imanayaa Sama-taliye, wuxuuna uga sheekeynayaa dhibaatadii uu suuqa kala soo kulmay.

Sama-taliye:- Bal ii warran Aw-kuku, saw sooma arkin gabdhihii . . . suuqa joogay?

Aw Kuku:- Haa . . . haa waa soo arkay . . . !!! gabadhii ugu horeysay aan u yeeray . . !!! waa i i timid waana uga sheekeeyey . . . xalay saqdii dhexe ma ila jooginoo . . . aan dhahaayey . . . dhirbaaxo hoohee adigana Sama-taliye, waa tii i gaartay oo kale ma kugu macdahay . . . !!!

Sama-taliye:- War haye ma anigaad i dileysaa?

Aw-Kuku:- Maya ee sheekadii aan kuu wadaa . . . !!!

Sama-taliye:- ii . . . hi . . . . !!!

Aw Kuku:- Tu kale ayaan wacay . . . taas iyada ma aheyn ma ogtahay dhirbaaxo kale ayuu u taagay Sama-taliye . . . !!!

Sama-taliye oo carooday isagoo leh, riyo dambe haddii aan fasiro i dhirbaaxyeey, ma beenteydii buu run mooday.

QOF WALIBA WAXA QALBIGIISA KU JIRO AYUU KU JAWAABAA

(waxa curiyey: Maxamed Cali Kaariye)

Sheekadani waxay ku saabsan tahay qoys la yiraahdo: Qoyskii Cawaale; oo lo'leey ah, waxaanay deris wada ahaayeen nin la yiraahdo Aw-Cumar oo isna beeraley ahaa. Qoyska Aw-Cawaale waxay wada yihiin Maqanaha joogo oo qof waliba oo qoyska ka mid ah, markii wax la weydiiyo ku jawaabo, waxa uu jecel yahay ee maankiisa ku jiro.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa oday Cawaale lo'dii raacay, waxayna gashay oo ay daaqday beertii Aw-Cumar.

Aw-Cumar: War yaa cawaale, lo'da beerta iiga celi, haddii kale wax kalaad isku arki!

Cawaale: Sacaygu iib ma aha!

Aw-Cumar:- War iibkaaga ma ahee lo'da beerta iiga celi ha is yeelyeeline.

Cawaale:- Wallaahi qiimo kasta haddaad u gaarto inaan ku gadeyn firkiisna weligii lama gedin.

Aw-Cumar oo yaabban baa iska tegaaya, Cawaalana gurigiisii ayuu yimid, markii ay qadada u soo dhigtay afadiisii oo Cawrala la yiraahdo:

Cawaale:- Ma ogtahay maanta in la yiri: Saceenna dhiinbaar ha lagaa iibiyo.

Cawrala:- Qadada hadday xuntahay gabadhaada baa karisay, !!!

Cawaale:- Qadada ka hadli mahayee, saca waxaan idhi weligii la iibin maayo.

Cawaale oo yaabban ayaa qadadii cunay wuuna baxay, waxaa timid Ceebla oo ay dhaleen Cawaale iyo Cawrala.

Cawrala:- Aabbahaa wuxuu yiri: qadada ma fiicna maanta cusbadana way ku badan tahay. !!! . . . dhagaxna way leedahay.

Ceebla:- Adiga iyo aabbahay ninkaad i siisaanba raalli baan ka ahay. !!!

Cawrala:- Waxaan ku iri: Aabbahaa qadada way xuntahay buu ku yiri: Anna waxaan ku iri: gabadhaada baa karisay. !!!

Ceebla:- Ama ha fiicnaado ama ha xumaado ninkaad i siisaan waxba kama qabo oo waan raacayaa, duco iyo habaar, duco ayaan doortay.

Cawrala iyadoo yaabban ayay baxday. . . !!! waxaa Ceebla u yimid Cali oo walaalkeed ah:

Ceebla:- Caliyoow hooyaday iyo aabbahay nin bay i siiyeen.

Cali:- Haddii lay eryo ma shaqaan waayi . . . !!! . . .

Ceebla:- Waxaan ku iri: walaal ninbaa lay siiyey . . . !!! anna waxaan iri: ninka waalidkay i siiyo waan oggolahay.

Cali:- Ewelba reer uunbaan u shaqeynayey, haddana reer uunbaan u shaqeynayaa ee ha lay eryo ama ha lay daayo . . . waxba igama gelin.

TOOSINTA TUURTA

(Waxaa curivev: Maxamed Warsame Tabantaabo)



Beri waxaa jiray nin maal-qabeen ah, oo aad caan u ahaa, magaciisana la yiraahdo Samatar. Samatar magaalada uu degganaa si aad ah ayaa looga yaqiinnay, wuxuuna ahaa nin kibir badan oon dushiisa duqsi duulayaa dul mari karin, wuxuuna ahaa nin xarrago badan, aadna u jecel faanka.

Ninkii Samatar ahaa waxaa ku timid jirro aad halis u ah, waxaana shafka hore iyo dhabarka ka soo baxday tuur, waqtiyadaasi ma jirin dhakhaatiir casri ah, Samatar muddo dheer ayuu guriga ka soo bixi waayay, isagoo ka xishoonayey inuu suuqa la dhex maro tuurta, isagoon u arkayn jirro Ilaahay u keenay, maadaama uu ahaa nin aad u kibir badan. Samatar wuxuu isugu yeeray wax allaale wixii culimo iyo caamo ahaa ee lagu tuhmayey inay xanuunkiisa wax ka qaban karaan, hase yeeshee waa loo taag waayay.

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu Samatar isugu yeeray saaxiibbadiis, wuxuuna ka codsaday inay magaalada ka naadiyaan in qof allaale qofkii tuur toosinteed yaqaanna la siinayo lacag dhan (50.000), konton kun shilin oo waqtigaas ahayd lacagtaasna uu bixin doono ninka caanka ah ee maalqabeenka ah, lana yiraahdo Samatar oo ah ninka tuurta faraha kulul ku hayso.

Laba xarfaan ah oo suuqa aad ugu xumaa magaaladana ku cusbaa, ayaa maqlay naadadii waxayna ku tashadeen siday lacagtaasi afka ugu dhigan lahaayeen faqriguba ha daayee, labada nin ee xarfaanta cadilan ah waxaa la kala yiraahdaa Buraale iyo Bookh, hase yeeshee waxay la baxeen kuwo cusub oo kala ah:-
Shiil iyo Naxar.

Shiil:- Waa maqleysay naadada ee maxaynu yeellaa, lacagna ayadaa noogu dhaw?

Naxar:- Anigaa kuu garanayee ee ha deg-degin ee i sug.

Saacaddaan laga bilaabo adigu Shiiloow waxaad tahay Dhakhtarkii Tuurta Daweynayey, anna kaaliyahaagii baan ahay.

Adigu haatan aad gurigii aan seexaneynay, oo u sii ekeysii meel wax lagu daweeyo, adiguna isku sii ekeysii Dhakhtar.

Shiil:- Waar horta qalabka aan doonayno inaan wax ku daweyno xaggeen ka keeneynaa, maxaanse ka dhigeynaa?

Naxar:- Taasi waa sahal, ma innagaa wax run-run ah wadannay, sidaan lacagta uga qaadi lahayn Samatar uun baanu wadannaa, waxaad yeeshaa, wax xoogaa lacagta ah ee aad inoo heyso suuqa hore u sii mar oo sii gad kal xawaash, miishaar iyo loox ballaaran oo dhabar qof deeqa.

Shiil:- Sideen yeeleynaa markaas?

Naxar:- Kal xawaashka waan ku burburinaynaa, miinshaartana tuurta dheeraata ayaan ku jareynaa, looxana waan ku seexinaynaa.

Shiil:- Sideebaa ninka loogu tegayaa, sideese lacagta uga qaadannaa. !!!

Naxar:- Anigaa garanaaya . . . . ee ii daa arrintaasi. !!!

Shiil iyo Naxar mid walba hawshiisii ayuu ku dhaqaaqay, Shiil isagu markiiba intuu qalabkiisii ururSaday ayuu tegey gurigii oo sii sallaxay.

Naxar gurigii Samatar ayuu aaday, wuxuuna arkay isagoo iridka hore fadhiya, qaylo ayuu soo bilaabay isagoo leh: Ogeysiis . . . ogeysiis . . . . magaalada waxaa yimid Dhakhtar tuurta . . . waana nin caan ah oo dad badan oo hore soo daweeyey . . . yaan loo deymo la'aan.

Waxaa markuu iridkii hormarayey u yeeray Samatar oo ku yiri: Adeer duco qabe, bal kaalay halkuu joogaa ninku?

Naxar:- Anaa ku geynaya meeshuu joogee, horta lacagta naadada ma oggoshahay?

Samatar:- Haa waan oggolahay ee waa imisa?

Naxar:- Waa shan kun oo kaliya. !!!

Samatar:- Lacagtii waa tane hadda ii gee. !!!

Waxaa israacaya Naxar iyo Samatar, marka ay joogaan iridkii guriga ayuu haddana Naxar leeyahay, waxaa lagaa rabaa lacagtii aad ku dhaafi lahayd iridda ee laguugu tusi lahaa takhtarka oo dhan iyana shan kun oo shilin, Samatar markuu dhiibo shantii kun ee iridda, ayaa loo geynayaa.

Shiil:- Sow adiga ma aha ninka tuurta laga toosinayaa?

Samatar:- Haa . . . haa . . . Adeer . . . saw uma jeedid siday ii qal-qalloocisay.

Shiil:- Lacagta toosinta tuurta waa la hormarinayaa, ee soo hor mari horta, labaatan kun shilin.

Samatar lacagtii labaatanka kun ahayd ee hormariska ayuu bixiyay.

Shiil:- Magacaa?

Samatar:- Waxaa lay yiraahdaa Samatar,

Shiil:- Samataroow diyaar ma u tahay inaan u hawl galno toosinta tuurtaada?

Samatar:- Haa . . . haddaa maaxaan soo doontay . . !!!

Shiil Looxaan korkiisa ku soo seexo, waar adna Naxaroow ka xidh indhaha, gacmaha, iyo lugaha, waxaadna u seexisaa dhinaca dhabarka horta aan midda gaaban ee shafka toosinnee, !!!

Samatar:- "Isagoo indhaha ka xiran ayuu yiri "haddii aad tuurta iga toosisaan waxaan idin siin doonaa lacag middii aan ballan qaaday ka badan."

Shiil:- Toosin annagaa kaa ballan qaadeynee, adigu adkayso oo ha cabaadin, tuurta toosinteedu waa xanuun badan tahaye.

Samatar:- Waa yahay:-

Shiil intuu qaatay kal-xawaashkii oo labadiisa lugoodna ka kala riday calooshiisa ayuu sidii mitxinta shafka xoog uga mariyey Samatar, isagoo leh, alla tuurtaadu adkaa. !!! . . . jebis waxaan ahayn wax kuma leh.

Shiil intuu ka dul kaco ayuu ku bilaabayaa tumis sidii badar oo kale.

Samatar qaylo ayuu oogta kaga qaaday isagoo leh, . . . waar iga joojiyaay . . . waar iiga joojiyaay . . . tuurteydaan iska wadanayaaye . . . bas ka dheh . . . bas ka dheh . . . Shiil ayaa yiri "Hadda waa jilicday oo waxayba gaartay waqtigii lagu jari lahaa miinshaarta ee adkayso.

Samatar markuu maqlo miinshaar ayuu aad u sii qaylinayaa isagoo leh: war Allahu Nebi . . . Waar Allahu Nebi . . . miinshaarna ha iiga gooynina . . . waxbana ha jilcinina ee iska kay daaya . . . . lacagna idinka dooni maayee qaata, Allaha idiin calfee.

Shiil:- Annaga waxaad nagula heshiisay inaan tuurta kaa daadinno ee sug horta.

Samatar:- Waayahay ee aan horta nasto, ee iga fura xargaha, waxoogaa biyo ahna i siiya.

Shiil:- Waar Naxaroow ka fur bal ha nastee. !!!

Samatar marka laga furo xargaha ayuu indhaha qac ku siinayaa labada nin oo midna miinshaar gacanta ku haysto, midna kasha xawaashka oo xoog badan, markaasuu intuu iridda eego isagoo, qaawan oo kaba la' cagaha wax ka dayayaa.

Samatar orodkii ayuu ku tegayaa gurigiisii isagoo Illaahay ugu mahad naqaya tuurtiisa uu la soo noqday, isagoo leh "Wallee malaha cid dambe tuur iga dawee ma iraahdo bas . . . bas . . . tuurteydaan haysanayaa".

XALWO MA QABTAA

AWEYS MAXAMED WAASUGE

Sheekadani majaajillada ah waxay ka mid tahay sheekooyinkii faraha badnaa oo qosolka lahaa kana dhasheen isku darkii Gobollada Waqooyi iyo Koonfur, kadib markay hanteen Xornimada.

Waxaa jiray nin la oran jiray, Macow Muriiddi oo ka mid ahaa shaqaalihii ugu horreeyey oo loo beddelay magaalada Hargeysa, bilowgii lixdameeyadii Macow intii uu ku noolaa Xamar wuxuu ahaa nin aad iyo aad u jeclaa xalwadda, wuxuuna galabtii tegi jiray dukaammada xalwada lagu iibiyo, oo uu ka gadan jiray.

Haddaba Macow waxaa loo beddelay Hargeysa, halkaasoo aan xalwadda laga isticmaalin sida badan, maalin maalmaha ka mid ah waxaa Macow isaga oo shaqeynaya maskaxdiisa ku soo dhacday xalwo, wuxuu isku sii daayay dukaamadii magaalada Hargeysa wuxuuna ugu horreyntii galay dukaan uu leeyahay Xaaji Barakaale, oo qaba haweeney magaceeda la yiraahdo Xalwo. !!! Goobtu waa dukaammadii magaalada Hargeysa, Macow Muriiddi oo gelaya dukaankii Xaaji Barakaale.

Macow:- Haye siiyo, xalwo ma qabtaa?

Xaaji Barakaale:- (Oo is leh tolow ninka xaaska garanayaa ee reer Xamarka ah ma farriin buu u sidaa, ... mise Xamar buu ku soo bartay, waa tii xalwo u dhoofi jirtay Xamare . !!!) Haa adeer, haa waa qabaa Xalwo !!!

Macow:- Wallaahi dhareera iga socda maalmahaan ma arkin, sidaan Xamar uga imid isheyda ma saarin . . . ee macaankeeda lee hadda soo xasuustay !!!

Xaaji Barakaale (Oo kolba gadaal iyo horay u ordaya oo maseyr xanaaqa ka muuqdo, isla markaana doon-doonaya wuxuu madaxa kaga gooyo Mocow), adeer bal fahmaye halkeed ku baratay Xalwo?

Macow M:- (Ooy daacad ka tahay Erayada uu ku dhawaaqayo ayaa leh) Lee, see waaye baaba, adiga miskiin lee tahay. !!! Xalwo macaanay, macaan badaneey . . . siin u tumi jiray . . . Wallee . . . Wallee weli waa xusuustaa !!!

X. Barakaale:- Khalaas . . . Khalaas . . . . rajo ma leh, war tanoo kale yaa arkay. !!!, waa dumay reerkii, carruurtii ka kac weeyaan, waryaa halkeebaad ku baratay baan ku leeyahay Xalwo?

Macow:- Ma kuu sheegin miyaa?

xalwo macaaney waxaan ku bartay xamar.

Xaaji Barakaale: Oo sideebaad u baratay?
Mocow M: Si fiican wallaahi, !!! kor iyo hoosaan ka bartay?!!
X. Barakaale:- Oo maxaad ka sameyn jirtay?
Mocow M: Hee... Hee.. see waaye adigaaba waan qabaa yiree.!!! sidee ii weydiisay.
X. Barakaale: (Oo miyirkii ka tegay welina is leh bal ka dhuux waxa uu Xalwo ku sameyn jiray), waa tahaye Adeer maxaad ku sameyn jirtay, kolkaad Xamar joogtay?
Mocow M: Yaaqaay shaqaa i sugeysee, !!! .... ee Xalwo Xamar aan ku tumi jiray, macaankeeda ma arkinoo siyo. !!! Gaduud waaye aadna waa u macdahay.
X. Barakaale: Adeer gartayee ma UI baad ku timi jirtay?
Mocow M.:- Xalwo maa UI loo quuraa, baaba, tartiibaa inaan u

qaado aan juq-juq ka siin jiree.

X. Barakaale:- Intuu soo wareegtay ayuu Mocow labada ind-hood dhirbaaxo iga hoo yiri. !!! nacala tullaahi baa kugu taalla, iyaduna saddexdeedii bay qabtaa illeyn waxay Xamar u tegi jirtay qurunkaa iyo wax ka daran.!!!

Mocow iyo Xaaji Barakaale, oo halkii isku haysta ayaa waxaa ku soo baxaya dadweynihii iyo dukaanleydii, waxaana durbadiiba goobta imaanaya nin boolis ah.

Ninka Boliiska:- War Xaaji, miyaad waalatay maanta, waa maxay dagaalkan iyo qayladan oo maxaa idiin dhexeeya Adiga iyo ninkan odayga ah?

X. Barakaale:- Ina gee isteeshinka, wallee inaan sidan uga harine, Maxfalkan hadal iiguma bannaane isteeshinka iyo Maxkamadda... Maxkamadda.... !!!

Mocow M.:- Waa i dhibay Duqaaney, waa i daaray.. laakiin maxkamadda horteedaan ku kala baxaynaa!!

Ninkii Booliska ahaa wuxuu isku kaxaynayaa Xaaji Barakaale iyo Mocow Muriiddi, wuxuuna geynayaa Saldhigga Hargeysa, wuxuuna arrintan iska horimaadka leh u gudbinayaa Taliyihii Saldhigga.

Tal. Saldhigga:- Haye Xaaji, waxaad ka mid ahayd Odayaasha Hargeysa, waa maxay buuqa iyo dagaalku. Bal siday wax u dhaceen?

X. Barakaale:- Arrintu oday-nimadii waa dhaaftay.... Waa dhaaftay ee Kiiska ma noo furan yahay?

Tal. Saldhigga:- Sug Xaaji.... war adiga magacaa?

M. Muriidi:- Aniga waxaa ley yiraahdaa Mocow Muriiddi.

Taliyihii wuxuu baarayaa siday wax u dhaceen wuxuuna mid mid u warsanayaa Xaajigii iyo Mocow.

Taliyihii:- Xaaji maxaad isku gasheen adiga iyo ninka Mocow la yiraahdo?

X. Barakaale:- War ma anaaba hadli kara, wax la sheegi karaaba ma aha Adeer. ... ee marka hore isagaa Dukaanka iigu yimaada bal wareyso.

Taliyihii:- Waryaa maxaad isku dirirteen?

Mocow:- Komaande, aniga Dukaankiis aan tegay, taasey waa runtiis, waxaan ka doonay Xalwo aan Xamar ku dhuuqi jiray amase ku cuni jiray... markaan weydiiyay Duqan, Xalwo ma qabtaa? haa aas i

yiri... waxaas i weydiiyey inteę ku baratay, waxaan ku iri; Xamar, waxaas i yiri: sideed yeeli jirtay? Waxaan iri: waa tumi jiray.

X. Barakaale:- Waa kaa afkiisa ka qiranaaya halkeen ka galaa maanta. Ilmahan yaa muslinoo iga qabta?

Taliyihii durbadiiba wuxuu soo xasuusanayaa halka ay arrintu ka qataaran tahay, wuxuuna helayaa ama ogaanayaa, in Xaaji Barakaale xaaskiisa la yiraahdo Xalwo, Mocowna Xalwada uu sheegayaa ay tahay tan la cuno.

Taliyihii: Salaama caleykum Xaaji, soo dhawow, horta ma hubsatay ninkan Mocow la yiraahdo xalwada uu ku weydiinayey?

X. Barakaale: War ma Xalwo midda aan qabo ahaynaa meelahan deggan?

Taliyihii:- Saas ma aha Xaaji, Mocow wuxuu ula jeeday Xalwada la cuno, adiguna maad hubsanoo durbadiiba waxaad u fahamtay xaaskaaga, dhibaatadana waxay ka timid af guriga (Lahjada), sida: xalwo ma qabtaa, micnaheedu yahay Xalwo ma haysaa.

Xaajigii intuu boodo ayuu Mocow dhunkanayaa isagoo ku leh, Raalli ahaw, adiga adduunkii ila rogay.... Alla tii xalwo ahaydna waxa halkan ka dhacaya lama socoto!!

Mocow:- Xaaji ma waxaad u maleyneysay naagtaada Xalwo? Aniga ma aqaan naagtaada magaceeda, waan iska socday, Xalwo la cuno leen raadinayey!!

Iyagoo wada qoslaya ayay ka soo baxeen Saldhigga oo midba kan kale raalli ahaw ku leeyahay.

OROD WAA NASIIBKAA

Waxa curiyay: Maxamed Warsame Taban-taabo)

Haweeney la yiraahdo Batuula, iyo odaygeeda oo isna la yiraahdo Liibaan ayaa waxay isu dhaleen hal wiil oo kaliya oo ay ula magac baxeen Saxardiid.

Saxardiid markii uu yaraa wuxuu lahaa saan-saan nacas, wuxuuna markii uu weynaaday uu la yimid Astaamihii nacasnimada. Had iyo goor kama daba hari jirin hooyadiis, hadday kawaanka aaddo wuu la aadi jiray, hadday raashinka karineyso uu la karin jiray ama wuu ag fariisan jiray, meel ay u dhaqaaqdo oo uu uga hari jiray ma jirin, haba yaraatee.

Wiilkii Saxardiid markii uu dhawr iyo toban jir gaaray wuxuu bilaabay inuu daba dhaqaaqo gabdhaha oo uu iska daba socdo, isagoon la hadlayn, kamana daba hari jirin ilaa ay hooyadiis ka soo reebto. Wuxuuna ku oran jiray hooyadiis "Alla hooyo kuuskuuska laabta kaga yaal baan rabaa".

Subax subxaha ka mid ah markay hooyadiis khaati ka joogsatay ayay ku tiri saaka i raaci meysid adoon ii sheegin waxaad rabto. Saxardiid waa aamusay... markaasay hooyadiis ku odhanaysaa, hooyo ma naag baad rabtaa?. Saxardiid intuu yara sheexo ayuu

madaxa ruxayaa. Hooyadiis Batuula waxay ka ballan qaadday in ay aabbihiis Liibaan loo sheegi doono, loona dhisi doono gabadh allaale gabadhuu rabo.

Liibaan ayaa markuu subixii soo toosay ee uu quraacday ayay Batuula intay soo hor fariisatay ku tiri; "Liibaan... bishaaro... bishaaro..."

Liibaan: Bil khayr... bil khayr...

Batuulo:- Saxardiid... curadkeennii waa gabadh doon ee soo gabar uma dhisno.

Liibaan:- Naa Batuulo... bal hubso malaha Saxardiid naag doon maahee!!!

Batuulo:- Saxardiid muxuu qabaa, miyaanu khayrkii la mid ahayn... miyaanu naag guursan karin, oo aanu nin ahayn?

Liibaan:- Aniga ilama aha ninka weli boggaaga ku jira ee dhaan-dhaanka aad mooddo inuu naag doon-ayee, isagu ha doonto anigu u dooni maayee... Isagu ha doonto, xoolana anigaa ka bixinaaya.

Batuulo:- Hooyo waad maqleysaa siduu aabbahaa kuu dhaliilayee, anna ha i ceebeyn, adna ha is ceebeyn ee aabbahaa wax soo tus, soona qabso midda ka dhaqdhaqaaqda magaalada.

Saxardiid waa baxay, wuxuuna dhinaca ka joogsaday gabadh tagsi sugeysa goor ay qoraxdu kulushahay, Saxardiid fartuu afka kula jiraa, qoortana hadba gees ayuu u leex-leexinayaa, isagoo hadba ku soo yara durkaaya, xaggeedana u soo dhawaanaya.

"Gabadhii waxay qalbiga iska leedahay ma waalan yahay, mise si-si buu yahay, mise waxbaa u dhiman!!!".

Saxardiid gabadhii ayuu si wacan u fiiriyay... iyana waa fiirisay, Saxardiid, intuu qoslo qosal nacasnimo... ehi.... ehi.... ala way i soo eegtay... Alla way i dooneysaa... allaa ayaa hooyaday u sheega.... Wiilkii Saxardiid intuu si fiican ugu soo dhawaaday ayuu gabadhii garabka ka taabanayaa, isagoo raba inuu taabto naaska. Gabadhii intay candhuuf ku tufto ayay oraneysaa, waar naga tag nacasyahow dhareerinayaa!!!

Saxardiid: Alla way ila hadashay... alla way ila hadashay... Abbaayo anaa ku guursanaayee halkaa ha ka sii dhaqaaqin, waxaan u soo sheegayaa hooyaday iyo aabbahay?

Saxardiid wuxuu imaanayaa gurigii isagoo neef tuuraya, qoslayaana sacabbadana isku garaacaya. Hooyo Batuulo ayaa ku tiri "Hooyo bal ii sheeg waxaad ku qosleyso?"

Saxardiid:- Hooyo waa soo helay naagtii...

Batuulo:- Ma hubtaa... ma diyaarbaa.... sidee bay u taal?

Saxardiid: Waa indha waaweyn tahay, anigana way iga dheer tahay.

Batuulo waxay u yeedhay Liibaan, waxayna ku tiri "Xoolihii diyaari inantii Saxardiid durba waa soo helay"

Liibaan:- Haddaabu iga tegee, naagta goormuu soo helay, xaggeese joogtaa. Aaway Saxardiid bal aniga ha ii warramee !!!

Saxardiid: Aabbe gabadha waxaan ku ogaaday inay i dooneyso horta way i soo eegtay, way ila hadashay, korkeedana waan taabtay, laamigeyna taagan tahay oo igu sugeysaa... anna i sug aan soo dhahay, aabbahay iyo hooyaday baan u soo sheegayaa.

Liibaan:- Batuula... iga kaxee nin la moodkan, adna waa nasiibkaa, haddii Ilaahay kan curad kaaga dhigaye, iga fogee nacaska.

BEENTII BEENTU ROGATAY

Waxaa curiyay: Maxamed Warsame "Tabantaabo"

Sheekadani waxay ku saabsan tahay qoys caafimaad qaba oo deggan oo shaki iyo cudur aan sal lahayn lagu abuuray.

Waxaa jira dad xumaha ku qaraabta faafiyana waxaan jirin si ay danahooda uga gaaraan gaar ahaaneed, sida:- Mingiska, Booranaha iwm. Iyagoo ujeeddada ugu weyn ee ay ka leeyihiin tahay in ay ka helaan dhaqaale. Tabaha ay isticmaalaanna waxay tahay iyagoo adeegsada dad ay shirkad yihiin oo u faafiya beenta ay ku shaqeystaan, mararka qaarkoodna si toos ah ugu taga dadka sidii ay uga dhaadhicin lahaayeen qabidda cudurka, sheekadu waxay ku bilaabaneysaa sida tan soo socota:-

Duqdii Dabeeya ahayd ayaa goor barqo ah timid guriga reer Saalax, oo ay hore isu aqoon jireen, odaygii reerkuna uu shaqo ku maqan yahay!!!

Dabeeya: War hooddi guriga yaa jooga?

Falan:- Waa la joogaa ee soo dhaaf... alla waa dabeeya.... soo dhaaf eeddo; bal iska warran...!

Dabeeya: Anigu waan ladanahay ee idinka reer Saalax iska warrama?

Falan:- Annagu waan ladan nahay... odaygiina shaquu ku maqan yahay, carruurtiina; Ilyaas iskuulkiibaa ka xiranoo ayeydii baa kaxaysatay, Salxaanna carro geddis baa loo diray oo miyiga buu ku maqan yahay.

Dabeeya: Allaa.!!! Adigu ma caafimaad qabtaa, maba caafimaad qabtide!!! allaa... maxaa quruxdeedii aan ogaa sidan u beddelay?

Falan:- (Falan oo dareen galay), eeddo waayahan dambeba sisi baan ahaa!!!

Dabeeya:- Aad iyo aadbaa lagaaga fahmayaa.... ma anigaan garan!!!

Falan:- Waxaan kuu sheego garan maayo, laakiin... laakiin,.....

Dabeeya: Anaa kuu garanaayee,, waxaan ku iri:... Aroortii markaad hurdada ka kacdo halkaa laab xuunshada ma lagaa qabtaa?

Falan:- (Oo la soo boodday) Alla... haa... Eeddo!!

Dabeeya:- Wallee... waa isagii...

Falan:- Isagee...

Dabeeya:- Waa laguu yaqaan ee ka gudub; waxaa kaloon ku su'aalay barqadii markaad suuqa wax ka soo iibsaneyso xoogaa yaroo harraad-harraad ahi ma ku qabtaan?

Falan:- Allaa.... haa Eeddo, Ilaahay muxuu Cilmi u dhiibay!!!

Dabeeya:- Su'aal baa ii hadhay ee cuntada dhan-dhanaanka leh aad ma u jeceshahay.?

Falan:- Alla haa Eeddo...!!! inaad ila joogtid ee aad ii jeeddid baad mooddaa.

Dabeeya:- Waa kii oo aan carro isku rogin, caad kuma daahna!!! alla... geesa dheere, wallee cidduu geeska la helaan geeda daaqin...!!!

Falan:- (Falan oo aamintay in cudurkii hayo) Eeddoy wax dawo ah ma leeyahay?

Dabeeya:- Waxaan dawo lahayn ma jiraan,, laakiin adduun buu u baahan yahay, laakiin kaagu sidaa uma sii buurna!!! Shso. 500/- oo cuudka laguugu sii gasho berri iyo 15.000,00 shilin oo keliya oo goobta ah....

Falan:- Alla Eeddo ninkaygu waa shaqaale ee ma awoodo!!!

Dabeeya:- Naa nacas yahay, goormaa raggu dumarka sirtooda u sheegtay; saw kii isagoo saddex qaba mid afaraad sii guursan jiray maaha.. !!! intaad sidan noqoneysay muxuu kuugu sii daawanaayay; hadduu nin wanaagsan yahay?

Falan:- Eeddo... !!! runtaa weeyee... ee waa aniga iyo isaga ee maanta ha ii soo hargalo... ee waa inoo berrito.

"Duqdii dabeeya way baxaysaa"

Falan oo keligeed isla hadlaysa.... "Wallee amba waan ka dhalin, ama waa la kala guuri iyadoo wax kala rareysa, waxna isku qaseysa, qadana aan karin, gurigiina isku daadsan yahay, ayaa waxaa soo gelaaya Saalax Ileeye, oo shaqadii ka yimid.

Saalax:- Falaneey; qadada iyo qubeyska iigu dhaqso, iskaa wax u qabsaa layga sugayaa.

Falan:- Wallee.. maantaanad qado iyo qubeys aan ku siiyo ku qaboobin ee ma u timid reerkaagii... iga qabso furayaashii guriga.

Saalax:- Naa bal cuudu billeyso, wixii dhacay ii sheeg..!!!

Falan:- Wixii dhacay ma kuu sheegaa,,, dhibaatadii aad iigu daawan jirtay sirteedii waa la helay..., haa waa la helay... haa waa la helay!!!

Saalax:- Maxaa sirteedii la helay!!! oo yaase helay?

Falan:- Anigaa sir helay iyo inaan jirranahay..., adiguna aad ogeyd.

Saalax:- Yaa kuu sheegay inaad jiran tahay?

Falan:- Waxaa ii sheegtay been ma sheegto... Xaajiyo Dabeeya.,,, berri ayeyna ii imaaneysaa" waxaana lagaa rabaa 500/- shilin oo cuud ah iyo 15.000 Shso. ee goobta Mingiska ah.

Saalax:- Naa xaggeen lacagtaas ka keenaa xaalkeena waad ogtahay...!

Falan:- Xaggeen.. xaggeen ka keenaa waaba shaqa-dooda... hadday kula culus tahay madaxaygaa kula fududee bartan ii dhig.

Saalax: (isagoo yaabban) war ilayn tanoo kale lamana arag lamana maqal; naa bal waxaad yeeshaa, !!! lixdii boqol ee mushaharkaan soo qaadee, hoo 500/- boqol cuudkaad sheegeyso ku iibso... boqolka kalena masaariif bay inoogu hadhay bal sii haay, adiguna falaneey bal sheydaanka iska naar ... waa la khayrayaaye. !!! lacagtii kalena waan baadi goobayaa.

Saalax:- Hooddi... Hooddi.. Saalax oo si xoog leh u garaacaya guriga Xaaji Maslax... Xaaji Maslax... Xaaji Maslax... hooddi hooddi...

X. Maslax:- (Oo ka yaabban sida albaabka loo garaacayo iyo qaylada ninka ayaa yiri) war waa kuma? war soo gal, waar maxaa ku helay?

Saalax:- Maxaa ma i heli waayay... !!! sow reerkii Reer Saalax ee dhisnaa habar waalani mijo iyo madax umay rogin.

X. Maslax:- War bal siday wax u dhaceen... ii waran?

Saalax:- Habar Dabeeya la yiraahdo, ayaa naagtii iga waashay oo ku tiri, "Jinni baad qabtaa, kuna xujeysay inay keento xoolo fara badan" marka adiga arrin baan kuula socday....!!!

X. Maslax:- Arrintaasi waa maxay?

Saalax:- Waa... waa.... saddex xaajo ee iyamaa kula quman?
— Ma habartaan dilaa, anna ha ley dilee?
— ma naagtaan furaa, anna naag la'aan, ilmahana hooyo la'aan?
— Mise shan boqol shilin 500/- oo ahaa caruurta masaruufkoodii oo cuud hadda layga qaaday iyo 15.000/- ayaad hadda i siin saaxiib?

X. Maslax:- Habartana dili meysid, naagtana furi meysid, lacagtana la bixin maayo, adiguna is dili meysid ee waxaan kugula taliyo yeel.

Saalax:- Waa yahay... saaxiib waa yahay.

X. Maslax:- (Wuxuu duuduubay laba warqadood oo loo ekeysiiyey xirsiga) wuxuuna ku yiri; Saalax; labadan warqadood mid illinka hore ee gurigaaga dhig, midda kalena sariirtaada madaxeeda geli, adiguna saacaddaan laga bilaabo waad waalan tahay, gurigiina tag, adoo waalan, hawsha inteeda kalena aniga ii daa.

"Saalax wuxuu isagoo jinniyo isku riday aaday gurigiisii, wuxuuna xirsigii koowaad dhigayaa isaga oo hareeraha iska fiirinaya, illinka hore, wuxuuna guriga gelayaa isaga oo sidii wax miyir la' ah".

Saalax:- Falanay... Falanay.. isagoo ku qaylinaya ayuu ku ridayaa xirsigii labaad sariirta madaxeeda, isla markaana iska bixinayaa dharka oo ku qaylinayaa... naa Falaneey... !!! ila soo dhaqso...

Falan:- Maxaan kuula soo dhaqsadaa?

Saalax: Naa diricii, rijibeetadii, dahabkii,, indha kuushii, dibna-caseeyihii, barafuunkii iyo kabihii taakada lahaa, ... dhaqso... dhaqso.... iigu keen.

Falan:- Allaa... allaa naa miyuu waashay, halkeed u socotaa?

Saalax:- Xaggeed u socotaa... xaggeed u socotaa... naa sow tan magaaladoo dhammi is wada... is wada arooseyso, cid walba is wada aroostay, gaalo iyo muslin is wada aroostay. Saalax waxaa uu la baxay labadiisii kabood, midna uu isku dacaseynayo, midna intuu is hor qabtay ayuu muraayad ka dhigtay.

Falan markay maqashay, aragtayna waxaa uu ku kacayo, ayay qaylo afka kala qaadday" hayaay... hayaay... soo baxaay, waar odaygii wuu waashay waryaa muslim ahay, odaygii waa naga waashay, allaa... deriskiiyow Ducaale Nuuxow.... Ducaalle Nuuxoow...!!!

"Waxaa guriga soo galaya Ducaale Nuux oo ordaya"

Ducaale:- Naa maxaa dhacay? maxaa ku helay?

Falan:- Alla miyaadan arkaynin odaygii in la derderay, dharkaan anigu lahaana uu labisan yahay... !!! kabna uu muraayad ka dhigtay.

Ducaale:- Bismilaahi raxmaani raxiimi !!! Bismilaahi raxmaani raxiimi... naa ilaa goormuu ninku sidan ahaa?

Isla markaana waxaa soo gelaya Xaaji Maslax oo iska dhigaya sidii qof aan arrinta la socon, "wuxuuna xiran yahay qamiis cad, tusbax, koofiyad iyo cimaamad," wuxuuna gacanta ku sitaa itaab carabi ah.

X. Maslax:- War maxaa dhacay ma reerkiibaa is laayay?

Falan:- Xaa... !! Xaaji .... j .... j .... j Maslaxow Ilaahaybaa noo kaa keenay, bal aragoo quraan saar,... salligana ku tuf.

X. Maslax:- Ducaalow ninku yaanu kaa fara baxsan ee xajiyoo ku fariiso, adiguna Falaney sali iyo barkin iila soo orod ee xagaa qiblada u jeedi. Anna gambar ii keen.

Falan, Ducaale iyo Xaaji Maslax, waxay salliga ku soo seexiyeen Saalax oo riinka ka baxayo aad yaabto, oo marna boodaya sidii nin qalal qaba, labada qawlalna ka xunbeynaya.

Xaaji Maslax wuxuu kala furayaa kitaabkii, "Kitaabkii: Bismillaahi raxmaani raxiimi kitaab allow run sheeg, oo qayr sheeg, oo wixii jira sheeg?

X. Maslax:- War reerkan la falay, intuu sidan noqonaayay maxaa loo arki waayay?

Falan:- Allahu ma najeynaa ma ka warbayna!!!

X. Maslax:- Bal waxaad yeeshaan aawa Falan... Albaabada hore tagoo dhiniciisa midig waxa ku jira ka soo saar!!!

Falan:- Waxay xagga albaabka u dhaqaaqaysaa iyadoo indhaheedu ku liishaaman yihiin bartii loo tilmaamay, waxaanay meeshii ka soo dhufatay Xirsi iyadoo leh: Cuudi bilaahi mini sheydaami rajiin!!

X. Maslax:- Falanay kaasi waa kii koowaad... ee sida kitaabku sheegayo kan kalena ka soo saar, sariirta madaxeeda.

Falan:- Waxay iyadoo madaxa gacmaha u saaran yihiin u dhaqaaqaysaa xagga sariirta waxayna ka soo saareysaa xirsigii labaad iyadoo leh: Allahayow masiibadan naga samata bixi!!!

X. Maslax:- Kii kalena ma la helay... !!! waa Ilaahay mahaddii, waa Ilaahay mahaddii... , waa ladnaanayaa Saalax waa ladnaanayaa... insha Allaah.. insha Allaah...

"Isla markaa Saalax khuuro dheer ayuu gelayaa"

Falan:- (Oo farxad ka muuqato ayaa leh) Alxamdu Lillaahi rabil Caalamiin !!! wuu hurdaa, wuu gam'ay!!

X. Maslax:- Falanay waa maxay naagta reerka qastay, adiga ku wareerisay, odeygiina walaaqday, carruurtiina sigtay?

Falan:- Allaa... waa runtaa Xaaji ee habari waa jirtaa ee ma iyadaa?

X. Maslax:- Haa sidaa waan u filayaa, sida uu kitaabku sheegay bal i sug aan ku noqdo... kitaabka haddana.. haa... haa... ma shan baa ma shan boqol baa .... ma shan kun baa... yaase qaatay lacagtaas?

Falan: Allaa... haa Xaaji waa shan boqol oo shilin oon cuudkii u sii siin lahaa habarta!!!

X. Maslax:- Yaad siin lahayd?

Falan:- Cajuusadii dabeeya ahayd ee wax baan fooxiyaa dhihi jirtay, ee na fashay.

X. Maslax:- Falanay waa Ilaahay mahaddii, haddii reerkii ladnaadaye, masaajidkaan aadayaaye... ee waxaan kugula dardaarmayaa: habartii aad ku sheegtay Dabeeya yay dib dambe agtaada u iman... haddii aad reerka wanaag la dooneyso, Xaajigiyoo hoosta ka qoslaaya ayaa leh... dib dambe ayay kuugu imaan, wuuna baxayaa.

Falan oo keligeed isla hadlaysa oo leh haddaan Ilaahay Sheekh noo keenin khatar baan ku sugneyn, waxa albaabka soo garaaceysa Dabeeya.

Dabeeya:- Hooddi... hooddi..

Falan:- Soo dhaaf.

Dabeeya: Eeddo iska waran...

Falan:- Eeddadaa ba'day oo balaayo kugu dhacday, ee iiga bax guriga ... waxayna ula baxday kabteedii, iyadoo ku celcelineysa iiga bax... iiga bax... guriga.

"Waxaa hortooda ku soo boodaya oo qeyladoodii ku soo kacaya Saalax" wuxuuna leeyahay.

Saalax:- Naa maxaad islaanta ugu qaylineysaa?

Falan:- Ilsaan ma ahayne waa munaafaqad sixirey ah...!!! oo waa tii na wada sixirtay.

Saalax:- Eeddooy raalli iska ahaw ee iska tag.

"Dabeeya iyadoo sii guryameysa ayay jidkeedii qabsatay".

Falan:- Balaayo ku aragtay, saw tay i waashay ninkana iga waashay.. Balaayo kula tagtay.

Saalax:- Naa ma anaa waashay?

Falan:- Haa ma adaan ogeyn in aad waalatay, saw taad dharkaygii isku rartay ee dharkaagiina tuurtay, kabta muraayad ka dhigatay, lacagtaan habarta u qaadayna ay tan tahay, oo iyana ay hadda soo doonatay.

Saalax:- Anigu hadda ma waalliye.... Adigu ma miyir qabtaa?

Falan:- Al-xamdu Lillaahi, waa Ilaahay mahaddii mar haddaad ii fayow dahay, aniguna aan fayoobahay, Xaaji Maslax mahadi ha ka gaadho.